

X.M.J. 10 Abirill 1961, lamba. 93

Xeernidaamiyaha sarrifka Gobolka Waqooyi, ee Shilinka Bariga Afrika iyo Shilinka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA KU MEEL GAAKA AH

Markuu arkay Qod. 85aad, Dastuurka;
Markuu arkay Qod. 8aad, ee Xeerka – Sharci, ee 6da Maarso 1961, lamba. 2;
Markuu tixgeliyey baahida loo qabo in nidaam loo dejiyo sarriska ka jira Gobolka Waqooyi, ee Shilinka B.A. iyo Shilinka Soomaaliyeed;
Markuu arkay soojeedinta Golaha Wasiirrada;
Ayada oo lagu saleynay soojeedinta Wasiirka Kowaad, oo la tashaday Wasiirrada Lacagta iyo Wershadaha iyo Ganacsiga;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Hawlgallada sarrifka Waqooyiga Gobolka gudahiisa ee Lacagta Shilinka B.A. iyo Shilinka Soomaaliga waxay ka bilaabeen Abiriil 22, 1961 waxayna dhammaanayaan 25ka Juunyo, 1961 iyadoo sii marinaya Bangiga Qaranka Soomaaliyeed.

Qod. 2

Sarrifka waxaa Hargeysa iyo Berbera ka fulinaya laamaha maxalliga ah, ee National & Grindlays Bank Ltd dhammaan muddada ku xusan Qod. 1aad.

Meelaha kale, sarrifkaha wuxuu ka dhacayaa iyadoo loo marayo xafiisyo joogto ah iyo kuwa guurguura oo uu si gaar ah Bangiga Qaranka Soomaaliyeed uga sameeynayo Degmo kasta. Gudoomiyaasha degmooyinku, iyadoo la tashnaya saraakiisha Bangiga Qaranka Soomaaliyeed, .. waxay goynayaan maalmaha uu sarrifkku ka dhacayo meelo kala duwan, iyadoo la siinayo xayisiinta ugu balaaran si waafaqsan caadooyinka maxaliga ah.

Qod. 3

Dhammaan dadka dabiiciga ah iyo kuwa sharciga ah, ee deggenaanshahooda ku yaal Gobollada Woqooyi iyo kuwa ku sii wata meheraddooda halkan, waa inay shilink soomaaliga oo ay haystaan ay Gobolka gudahiisa ku haystaan u beddeshaan beddeshaan B.A..

Tigidhada lama beddeli doono dabcan iyo kuwaas sabab kasta ha noqotee, looma aqoonsanayo inay ansax yihiin, iyo sidoo kale shilimaadka la jarjaray.

Aqbalaadda ama aqbilaad laaanta sarrifka lacagta birta ah iyo lacagta xaashiyaha ah, ee shilinka B.A. waxaa lagu go'aaminayaa iyadoo la raacayo shuruucda u degsan Guddiga Lacagta Bariga Afrika.

Haddii uu jiro wax shaki ah oo ku saabsan sharci ahaanshaha lahaanshaha iyo caddeynta ama tuhunka ah u hoggaansamida lacagta iyo qawaaniinta lacagta ee dhaqan galay, sarrifka waa

la hakinayaa oo lacagta birta ah iyo tigidhada ayaa la dhigayaa, iyadoo aan la soo saarin rasiid, hargeysa Xarunta dhexe ee National & Gr.indlays Bank Ltd. ee magaca soo-jeediyaha, inta laga gaarayo go'aannada Guddiga ee ku xusan Qod. 4aad ee soo socda.

Qod. 4

Waxaa la dhisay Guddi ka kooban laba wakiil oo ka socda Guddoomiyaha Gobolka Waqooyiga iyo wakiil ka socda Bangiga Qaranka Soomaaliyeed.

Guddiga, haddii uu aqoonsado sharciyadda gacan-ku-haynta lacagaha ku xusan faqradda 3aad, ee qodobkan 3aad, waxa uu idmayaa (oggolaanayaa) sarrifka.

Haddii, ay jiraan ku-xad-gudubyo xeerarka jira, Guddigu wuxuu xoojinayaa joojinta sarrifka wuxuuna dokumentiyada u gudbinayaa Hay'adda awoodda u leh, isagoo ogeysiinaya National & Grindlays Bank Ltd. ee Hargeysa iyo cidda danaynaysa.

Qod. 5

Ayada oo la fulinaayo Qod. 11aad, ee Xeerka - Sharci, ee 6dii Maarso 1961, n. 2 Diw., Isku sarrifka lacagta xaashiyaha iyo birta qadaadiicda shilinka B.A. waxa uu ku dhacayaa halkii shilin Soomaali waxaa dhigmayaa hal shilin oo B.A.

Góaanno dambe ayaa wax ka beddeli kara beegga heerkaas sarrif, haddii uu yimaado isbeddel ka badan boqolkiiba 2 u dhiganka qiimaha dahabka, ee Shilinka B..A..

Qod. 6

Ilaa iyo 25-ka Juunyo 1961, waxaa mamnuuc ah soo-gelinta iyo dhoofinta shilinka B.A. gudaha Gobollada Waqooyi. marka laga reebo xadka iyo hababka ay oggol yihiin axkaamta sharci oo hadda degsan lacagaha qalaad.

Qod. 7

Laga bilaabo 26 Juunyo 1961, iyadoo la raacayo faqradda labaad, ee Qod. 9aad, ee Xeerka - Sharci, ee 6da Maarso 1961, lamba. 2 diiw., Shilinka Soomaaliyeed waxa uu awood gadhasho iyo wax ku oofin ka yeelanayaa gudaha Gobolka Waqooyi..

laga bilaabo isla taariikhdaas, maadaamaa gobolka la soo sheegay lagu haaynaayo (xafidayo) lacag Shilin B.A, ah oo bir iyo xaashiyo ah halgal kastana lagu asteynayo shilinka B.A.. waxaa dhammaan la hoos-geynayaa nidaamka sharci ee hawlgallada lacagaha qalaad.

Qod. 8

Ma jiro qodob ka mid ah xeerkan oo loo fahmi karo inuu beddel u yahay axkaamta Xeerka-Sharci, ee 6 Maarso 1961, lamba. 2 diw., Gaar ahaan marka laga hadlayo khasabnimada rogidda ka saarista waajibaadka lacageed iyo qoraallada xisaabaadka ah shilin soomaaliga ee ku xusan Qod. 10aad, ee isla xeerkaas.

Qod. 9

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga ah, ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Muqdisho, 10ka Abriil 1961.

Aadan Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Wershadaha iyo Ganacsiga

Shekh Cabdulle Maxamuud

Wasiirka Lacagta

Cabdulqaadir Maxamed Aden

Waa arkay waana diiwaangeliyey- diw. lamba. 5, Xaashi. lamba. 250.

Muqdisho, 19kii Abiriil 1961.

Hantidhowraha: **Axmed Dahir**